



UJEEEDO: WAKAALAD GAAR AH "PROCURO DE SPECIALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay 11/08/2025, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanyaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- SACIID ABDULAAHI YUUSUF, Ina Luul Aadan Cali, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 01-02-1985, Sita: Sweden Pass.no., Lr. AA3970885	LA WAKIISHE:- LIBAN MOHAMUD ARAB, Ina Luul Aadan Cali, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 04-07-1987, Degan Huriwaa, Sita: Somali Passport, Lr. P01331841
TILMAAMAHA DHULKA Dhul Banaan oo Ku yaal: Muqdisho , Degmada: (Wardhiigley) , Cabirka: (20X15-Mt) , Looto No: 410-AY , Sida ku cad Warqadda Heshiis ku saabsan kala gadasho boos banaan (Rep.77030/MPN/2021) , Tr. 18/04/2021 , Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Saciid Cali Cosoble	SOOHDINTA DHULKA Bari: Jid , Koonfur: dhul dad, Galbeed: dhul dad, Waqooyi: dhul dad

B- Aniga oo ah **SACIID ABDULAAHI YUUSUF**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay **LIBAN MOHAMUD ARAB** Una Wakiishay Wakaalad Gaar ah, oo Ku Saabsan Dhulka Tilmaamihiisu Sare Ku Xusan yihiin, in Dhulkaas uu gadi karo, Wareejin Karo, Hibeyn karo, dhisi karo, ijaari karo, u dacwoon karo, qareen u qaban karo, uguna doodi karo Maxkamadaha dalka hortooda, Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **LIBAN MOHAMUD ARAB** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Dhulkaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **LIBAN MOHAMUD ARAB**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **SACIID ABDULAAHI YUUSUF**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

SACIID ABDULAAHI YUUSUF

Saciid

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

LIBAN MOHAMUD ARAB

LIBAN

1- HUSSEIN IBRAHIM MUDEY

Husein

2- SADIQ ABDI ISMAIL

Sadiq

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1735/T.P.N/25, Tr. 11/08/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee **1- SACIID ABDULAAHI YUUSUF** Ahna (Wakaalad Bixiye), **2- LIBAN MOHAMUD ARAB** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

By: **ABDULLAH**

NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"

Signature of Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO BOOS BANAAN OO MUNICIPALLE AH

Muqdisho: Maanta oo ay taariikhdu tahay 18/04/2021, anigoo ah **Dr. Saciid Cali Cosoble**, ahna Nootaayaha Muqdisho, xafiiska ku leh inta u dhaxaysa Masjidka Abuhurayra iyo Shirkadda Dahabshiil ee Suuqa Bakaaraha ee Magaalada Muqdisho, waxaa xafiiska iigu yimid ayagoo heshiis ah, mudanayaasha hoos ku xusan:

<p>ISKA IIBIYE AHNA WAKIIL: AHMED BULE NUR, Hooyo: Budeeyo Xaashi Axmed, Somali-ethopian ah, Ku Dhashay: Feer-feer, Sanadkii: 1971, Degan Muqdisho, Leh: Ethiopian Pasport, Lr. EP6064420.</p>	<p>IIBSADE: SACIID ABDULAAHI YUUSUF, Hooyo: Luul Aadan Cali, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 1985, degan Sweden, Leh: swedish passport, Lr. 95700168.</p>
<p>WARBIXINTA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO Dhulkaan oo ku yaal: Muqdisho, Degmada: Wardhiigleey, Cabirka: (20X15)-M, Lotoo No: 410-AY, W.M.L: 51228/2013, Tr. 30/10/2013, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Dr. Saciid Cali Cosoble.</p>	<p>SOOHDINTA DHULKA Bari: Jid, Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Dhul dad. QIIMAHA DHULKA: USD \$40,000 (Afartan Kun Oo Doolarka Mareykanka ah).</p>
<p>ASALKII HORE EE DHULKA: Maxamed Axmed Absuge, Cabirka: (40X120)-M Lotoo No: 407 ilaa 422-AY, Rasiid No. 417893, Tr. 03/09/1990, Kana Soo Baxay Dawladda Hoose Muqdisho.</p>	

Hadaba qoraalka sare iyo kan soo socda oo wada xariira ayaa dhinacyada heshiiska waxay caddeynayaan sidatan:

ISKA IIBIYE AHNA WAKIIL: Aniga oo ah **Ahmed Bule Nur**, Wakiilna ka ah **Abdul Bule Nur** sida ku cad wakaalada gaarka ah **Rep. No. 22082/21, Tr. 17/04/2021**, kana soo baxday Nootaayo Dayax Laanta Nairobi, uuna saxiixay Dr' Aadan Jim'aale Mohamed, waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskaxda iyo caqligaba kafiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyay **Saciid Abdulaahi Yuusuf** dhul banaan oo tilmaamihiisu sare ku xusan yihiin, oo aan ku wada qoran nahay aniga iyo **Abdul Bule Nur**, waxaan kale oo aan cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskaan, isla markaana aan anigu mas'uul ka noqon doono wixii ceebaal milkiyadeed ah ee la xiriira isla dhulkaan, waxaan kaloo caddaynayaa in aan u qaaday dhammaan lacagta sare ku xusan, wixii taariikhda sare ka danbeeyana dhulkaan milkiyadiisa, faa'iidadiisa iyo bixinta canshuureedba wuxuu u wareegay iibsade **Saciid Abdulaahi Yuusuf**.

WAKIILKA IIBSADAHA: Aniga oo ah **Daahir Xasan Shiikhow**, waxaan dhankayga heshiiskan ku caddaynayaa in **Ahmed Bule Nur** si buuxda iigu wareejiyay dhulkaan lehna sifaha uu ku soo xusay isla markaana aan u gudoomay iibsadaha dhulkaan, una saxiixay kaalintiisa heshiiskaan.

SAXIIXA WAKIILKA ISKA IIBIYAHA

AHMED BULE NUR
Ahmed Bule Nur

SAXIIXA WAKIILKA IIBSADAHA

DAHIR XASAN SHIIKHOW
Shiikhow

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1- DAAHIR MAXAMUUD DHAGEEY

2- BARRE AXMED CISMAAN

3- DEEQ CIISE ASHKIR

Rep. 77030/MPN/2021

(CADDEYNATA NOOTAAYAHA)

Tr. 18/04/2021

Anigoo ah Nootaayaha Muqdisho, **Dr. Saciid Cali Cosoble**, waxaan caddeynayaa in saxiixyada sare yihiin kuwii runta ahaa 1- **Ahmed Bule Nur** (ahna wakiilka iibiyaha dhulka), 2- **Daahir Xasan Shiikhow** (ahna wakiilka iibsadaha dhulka), iyo waliba Sadexda Nin ee Soomaaliyeed oo dhanka maragga ka caawiyey oo kor ku xusan, Dadkaan oo anigu aqoonsadey hubiyeyna in magacyadaas ay leeyihiin waxay heshiiskaan igula saxiixeen Xafiiska iyaga oo xis qaba raalina ah, Caafimaad qaba, Xiskooduna taam yahay, Cid khasbeysana aysan jirin, Waana Beec ansax ah oo Waafaqsan Shareecada Islaamka.

By: M.baniin





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 15/09/2025

Aniga oo ah **Maxamed C/laahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in dib loogu Celiyey Nairibi Wakaaladaan **Liibaan Maxamuud Carab** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Gaarka ah **Rep No. 1735/T.P.N/25, Tr. 11/08/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	Liibaan Maxamuud Carab
La Wakiishay	Dhul
Cabirka	20X15-M
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada W/ley
*Lotto Lambar	410-AY
W.M.L	77030/MPN/2021, Tr. 18/04/2021 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Wakaalada	11/08/2025

FG Wakaaladaan Waxaa Dib Loogu Celiyey Nairobi

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed C/laahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Liibaan Maxamuud Carab